







Mir yar: Shekadii Wangari Mathay



 Nicola Rijdsdijk
 Maya Marshak
 Anwar Mohamed Dirie
 somali
 nivå 3

(uten bilder)



Barnebøker for Norge

barneboker.no

Mir yar: Shekadii Wangari Mathay

Skrevet av: Nicola Rijdsdijk

Illustrert av: Maya Marshak


Oversatt av: Anwar Mohamed Dirie

Denne fortellingen kommer fra African Storybook (africanstorybook.org) og er videreformidlet av Barnebøker for Norge (barneboker.no), som tilbyr barnebøker på mange språk som snakkes i Norge.


Dette verket er lisensiert under en Creative Commons

[Navngivelse 4.0 Internasjonal Lisens.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.no)


<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.no>




Tuulo ku taal dhinaca hooseyo buurta
Kenya ee Bariga Afrika, gabar yar ayaa
hooyadeed kala shaqeyn jirtay beeraha.
Magaceedu waxa uu ahaa Wangari.




Wangari bannaanka ayay aad u jeclaan
jirtay. Baangad ayay ku qodqodday
carrada beerta qoyskooda. Waxayna
dhulka gandacsan ku aastay miro aad u
yaryar.




Watigay ugu jeclayd maalinta waxa uu ahaa marka ay cadceeddu dhacdo. Marka ay mugdi saaid u noqoto aragtida dhirta, Wangari waxay ogaataa in ay tahay xilligii ay guriga aadi lahayd. Waxayna qaadaa waddoyin dhuudhuuban oo dhex maro beeraha, ayadoo gudbeyso webi yaal markay baxdo.




Wangari waxa ay dhimatay 2011, laakiin waa aannu xusuusannaa mar walba oo aan aragno geed qurux badan.




Wangari waxa ay ahayd ilma fariid ah wayna sugi la eyd in ay iskuul aado. Laakiin hooyadeed iyo aabbahood waxa ay doonayeen in ay jooqto oo ay guriga ka caawiso. Markii ay toddoba jirsatay, walaalkood ka weyn ayaa ku qalqaaliyey waalidkeed in ay u oggolaadaan in ay iskuul aaddo.




Wangari si adag ayay u shaqaysay. Dadka duniida oo dhan ayaa ogaaday, waxaa na la siiyey abaalmarin caan ah. Waxa la yiraahdaa Abaalmarinta Nabada ee Nobel, waxa ayna noqotay haweeneyda ugu horeysay ee kaigeed Afrika laga siiyey abid.




Way jeclayd in ay wax barato! Wangari waxay wax ka baratay in badan oo badan buug walbey aqrisay. Iskuulka oo ay aad ugu wanaagsanaatey darteed waxaa lagu casuumay in ay wax ku barato dalka Maraykanka. Wangari waa ay faraxday! Waxa ay doonaysay in ay wax badan ka ogaato dunida.




Waxuu waqti gudbo ba, dhirtii cusbeyd waxa ay noqotay kayn, webiyadiina mar kale ayay biyo keeneen. Farriintii Wangari, Afrika ayay ku faaftay. Maanta, malaayiin geedo ah ayaa ka soo baxay mirihii Wangari.




Wangari wax badan oo cusub ayay ku
baratay jaamacada maraykanka. Waxa ay
baratay dhirta iyo sida ay u baxaan. Waxa
ayna xusuusatay sidii ay usoo kortay: la
ciyaarki walaaladeed hooska geedaha
kaymihii qurxoonaa ee Kenya.



Wangari way garanysay waxa ay tahay in
la sameeyo. Waxa ay bartay haweenkii
sida dhirta miro looga abuurto. Haweenku
dhirta ayay sii iibin jireen lacagta ka soo
baxdana waxay u isticmaali jireen in ay
qoyasaskooda ku daryeelaan. Haweenkii
waxa ay noqdeen kuwo faraxsan. Wangari
ayaa ka caawisay in ay dareemaan
awooddooda iyo xoog.



Markii ay wax sii barataba, waxa ay sii ogaanaysay in ay dadka Kenya aad u jeceshahay. Waxa ay doonaysay in ay noqdaan kuwo faraxsan oo xor ah. Markii ay wax sii barataba, waxa ay soo xusuusan jirtay gurigeedii Afrika.



Markii ay wax barashadeedii dhammeysatay, waxa ay ku noqotay Kenya. Laakiin wadankeedii waa is beddelay. Beero baaxad leh ayaa is daba jiidnaa dalki. Haweenku ma heysan xaabo ay wax ku karsadaan. Dadku fakhri ayay ahaayeen, carruurtuna waa ay gaajeysnaayeen.